



Gacaliye Waalidka ama Mas'uulka,

Barnaajijka "Say Yes Buffalo" ee Dugsiyada Dadweynaha Buffalo iyo Magaalada Buffalo waxay bixiyaan Xarunta Xagaaga (Summer Camp) oo 6 todobaad ah laga bilaabo **Luulyo 8, ilaa Agoosto 16, 2019**, Maalmaha: **Isniin ilaa Jimco**, Saacadda: **8:00 subaxnimo ilaa 12:00 duhurnimo**. Deeq Maalgelin dheeraad ah awgeeda, sannadkan ardayda dhigata Dugsiyada Dadweynaha Buffalo iyo Dugsiyada Jaarterka (Charter Schools) waxay aboodi doonaan in ay isku diiwaan geliyaan Barnaamijkan. Si aad ugu qalanto, ardaydu waa inay noqdaan kuwa deggan Magaalada Buffalo ayna ku jiraan fasalada Pre-K ilaa 6 inta lagu guda jiro sanad dugsiyeedka 2018-19.

Hawlaha xerada xagaaga (Summer Camp) waxaa ku jiri doona akhris, qorid, xisaab, hawlaha madadaalada, iyo safarada dibadda. Quraac iyo qado ayaa la siin doonaa maalin kasta. Gaadiidka lagu soo qaado laguna celiyo lama siin doono.

Si aad isugu diiwaan geliso, fadlan buuxi foomka isqorista ee halkan ku lifaaqan. Waa inaad sidoo kale soo raacisaa Xogta talaalada ugu dambeeyey ee ilmahaaga. Haddii aadan haysan nuqul, fadlan la xariir kalkaalisada dugsiya ilmahaaga si isaga / iyada ay kuu caawiso.

Fadlan ugu dir waraaqahan si toos ah goobta xerada (Camp Site) ee aad jeceshahay inuu ilmahaagu dhigto (goobaha waxay ku taxan yihiin warqaddan dabarkeeda dambe) **ugu dambeys jimcaha, Juun 21, 2019**. Isku qoridu waxay ku saleysan tahay sida loo soo kala horeeyo, boosaskuna way xaddidan yihiin.

Fadlan ogow, meelo badan ayaa bixiya barnaamij maalin buuxda ah. Haddii aad rabto inaad isku qorto barnaamij maalin-buuxda ah, waxaa laga yaabaa in loo baahdo waraaqo dheeraad ah. Fadlan si toos ah ula xiriir goobka kaamka wixii faahfaahin ah.

Xaadiritaanka Xerada Xagaaga (Summer Camp) waa mid aad muhiim u ah. Haddii ilmahaagu leeyahay wax ka badan 5 maqnaansho oo aan cudurdaar lahayn, ilmahaagu wuxuu lumin karaa booskiisa kaamka xagaaga, waxaana lagu dari doona magaciisa liiska sugitaanka.

Haddii aad qabto wax su'aalo gaar ah ee la xiriira goobta, fadlan si toos ah ula xiriir xarunta kaamka (macluumaadka lagala xiriira karo ayaa ku yaal dhabarka warqadan). Wixii su'aalo guud fadlan wac "Say Yes Buffalo" 716.247.5310 ext. 218.

Wixii caawimaad ah ee xagga buuxinta codsiga, fadlan booqo Xarunta Qaxootiga ((Hope Refugee Drop-in Center) oo ku taala 248 West Ferry, Buffalo, NY 14213. Waxay furan yihiin Isniinta iyo Jimcaha 8:30 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo iyo Arbacada laga bilaabo 8:30 subaxnimo - 3:00 galabnimo . Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan wac 716.881.0539.

Waxaan rajeyneynaa inaan helno xagaa xiiso iyo isdhex gal leh!!!

Si daacadnimo ku jirta,

Dr. Kriner Cash
Superintendent
Buffalo Public Schools

David Rust
Executive Director
Say Yes Buffalo

